# GOLAHA WAKIILADA JSL

## WAAXDA HADAL-QORAALKA IYO GUDIYADA

**Kal-fadhigii 35aad fadhigii 10aad**
**16/12/2017**

**Ajendaha:-** Dooda Xeerka Maaraynta Deegaanka

**Quraanka:-** Md. Obsiiye

**Gudoominayay:-** Md. Baashe M. Faarax

**Gudoomiyaha:-** Sadaqa Allaahu Cadiim, waxaan ku soo dhoweynayaa Mudanayaasha ka dooddaya Xeerka Maaraynta Deegaanka.

**Md. Siciid Cilmi rooble:-** Bismilahaahi, shirgudoonka, munayaashaba waan salaamayaa, salaam kadib waxaan soo jeedinayaa in xeerkan sidiisa loo ansixiyo waayo gudidu aad ayay uga soo shaqaysay.

**Md. Ibraahim Axmed Reygal:-** xeerkan oo ay gudida iyo xildhibaanada aragti wadaagta ahi ay in badan ka soo shaqaynayeen samayntiisana iyaga ayaa lahaa isaga oo dhamaystirana waata gudida loo dhiibay, mid qudha Ayaan is dultaagayaa qolooyinkii nagala shaqaynayay xeerkani waxay lahaayeen warshado badan oo qiiq siidaaya oo taas ayay tix galinayeen, inagaba way jirtaa oo qiiqa baabuurta duuga ah ka **baxaa**, laakiin waxaa taas ka daran oo jira xaalufka deegaanka ah, markaa inta ayay naan xeerka ansixin aan ka eegno laba mee lood midi waa in invasive intaa ka badan la saaro midina waa in qofka dhulka guba ee dhuxulaysatada ah waa in ruqsadaha la siinayo la joojiyo, isla markaana waa in wixii lagu badali lahaa waa in la helaa.

Waxaan soo jeedinayaa in lagu xoojiyo qofkii guba geed in la ganaaxaa 200,000 sh/sl oo hadii uu 10,000 oo geed uu gubo intaa loogu dhuftaa ama intaas oo xadhig ah loogu badalaa xadhig dhan 3sano ilaa 5sano xadhig gaadha intaa Ayaan ku soo gabogabaynayaa.

**Md. Maxamed Faarax Qabile: -** Waad salaamantihiin dhamaantiin xeerkan aan ka hadlaynaa waa nolosha oo dhan, waxaanu ku fadhiyaa xigmad badan akhriskiisana 2,3,4 cisho midna lagaga bogon maayo akhriskiisa xeerkaasi waxaa uu u baahan yahay in loo saaro gudi gaara oo tafatirta xeerkan oo golaha hor keenta isaga oo xeerkaasi kala qalan waanad mahadsantihiin.

**Md Xaamud Cismaan Cigaal:** - Shirgudoonka, xog-haynta iyo xildhibaanadaba waxaan jeclahay in aan tilmaamo xeerkani waa wax la isku geegeeyay waxaa uu ka hadlayaa bada, dhulka , usgaga iyo wasakhaynta hawada ayuu ka hadlayaa. Xeerkii la ansixiyay 2006 labarkiisuna ahaa 35 lr, oo isagu uu ka hadlayay dhirta oo ka hadlayay, hadana ma hayno wax kuwii hore badalayo, markaa waxaa loo baahanyahay in la kala qaybiyo oo dhawrka siyood ee uu u kala boxo loo qaybiyo.

Waxaa kale oo jirta hawshii ay lahayd dawlada hoose ee khashinka iyo nadaafada magaalada u xilsaarnaa ayaa ku jira oo ahayd in dawlada hoose xeer ka soo saarto oo ay shaqadooda u qabsadaan sidaa awgeed maadaama oo uu yahay xeerkani wax la isku geegeeyay waa in gudi loo saaraa oo waxaan ku raacsanaha xildhibaan qabile oo waliba muuse cawaale loo yeedho si uu talo uga soo bixiyo, waa in laga bogtaa xeerkan waad mahadsantihiin.

**Md. Muuse Maxamed Ismaciil**:- Waan salamayaa dhamaan shirgudoonka iyo xildhibaanadaba xeerkani waa xeer aad u mihiim ah marka aan si fiican u qaabayno, xeerka hal qodob ayaa ka maqan oo ah deegaanka dhul daaqsimeedka ah ee awal jiri jiray ee dadweynuhu ay haystaan in gacanta dawlada la soo galiyo ee xeerkan lagu daro waayo xoolihii ma haystaan meel ay daaqaan deegaankana waa ka mid, sidaa la sheegay in gudi loo saaraa waa muhiim oo si wanaagsan looga shaqeeyo xeerka oo wakhti la siiyo Ayaan odhan lahaa waanad mahadsantihiin.

**Md**. **Maxamuud Dhunkaal Guutaale: -** Qodobka ugu horeeya ee aan is dul taagayaa waxaa uu yahay magagaca xeerka oo ay ku qorantahay xeerka deegaanka waxaan ka dhigi lahaa oo aan u badali lahaa xeerka ilaalinta deegaanka waxaa kale oo aan soo jeedin lahaa xeerkani waa xeer aad u muhiim ah waxaanu saamaynayaa ilaa lix wasaaradood wasaarada Deegaanka, deeganka, beeraha, kaluumaysiga, wasaarada macdanta iyo tamarta iyo hay'ada NERED intaa oo wasaaradood iyo hayadaa mid walba qayb ayay ku leedahay iyada oo ay jireen xeerar aan hore u samaynay ,sida xoolaha, biyaha Macdantana wuu inoo yaalaa iyo tamarta, markaa waxaan soo jeedinlahaa inta isaga oo duuduuban ama aan laga doodin waa in marka hore deegaanka qiimayn lagu sameeyaa oo hadii ay noqoto dhulka, Bada, iyo Hawadaba waa in marka hore assessment lagu soo sameeyaa waayo waa in mar ka danbe wax yeelada gaadha iyo markii hore siday badqabka u ahayd la isugu qiyaaso.

Matalan hadeer wasaarada macdanta iyo tamartu waxay samaynaysaa baadhis shidaal baadhis ah, markaa inta aan la gudo galin hawsha waa in la ogaadaa Caradeeda, dhirteeda, noolaha ku noolba dhamaan waa in la sahamiyaa Ayaan soo jeedin lahaa

Waxaa kale oo aan taageerayaa xil-dhibaanada yidhi xeerkan Ayaan sidaa lagu ansixinin ee gudi ha loo saaro waayo xeerkani waa noloshii bilaw aadanka oo dhan si fudud haduu inoogo baxana dhibka uu gaystana inaga ayaa leh markaa waxaan odhan lahaa in gudi loo saaro oo loo yeedho dad khubaro ah Ayaan soo jeedin lahaa, waxaa kale oo jirta in xeerkan aan la saarin qeexid dhab ah sida deegaan oo kale markaa waxaan leeyahay xeerkan waa in gudi loo saaraa waanad mahadsantihiin.

**Md. Cumar Axmed Saleebaan (Sanweyne):-** Gudoomiye inkastoo aanan xeerka soo akhriyin hadana markii aan dul maray tusmada xeerka waxaa ii muuqan weyday seerihii ay dadku xidheen oo wadankii wuu xidhanyahay oo meel lamaraa ma jirto meel reer degaana ma jirto meel xoolo daaqaana aanay jirin, markaa waxaa ila haboon inta qofku yeelan karo waa in ay Meesha ku cadaataa oo inta hegter la sheegaa oo caashuurta laga qaadayo, oo hadii aad magaalada dhinac walba uga baxdo waxaad arkaysaa in wadanka badhkiiba uu nin iska oo tay arintaasina waa

National security waaxay ka mid noqonaysaa amniga qaran waana in xeerka la soo galiyo waad mahadsantihiin.

**Gudoomiye Baashe: -** Ina Muuse Cawaale xeerkan wax ayuu ka soo sameeyay doodii sidaa ayay ku dhamaatay fadhiguna wuu inoo xidhan yahay waa inoo barito hadii alle yidhaa.

**Cawad Cali Maxamed**
**Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka G/Wakiilada**
---------------------------------------------------

**C/risaaq Siciid Ayaanle**
**Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI**
-------------------------------------------